


Ciyaarta • Waxbarasho • Iskuxir • Awood Siin



Waxaan taageernaa qoysaska iyo xirfadlayaasha taageerada dadka naafada ah si ay u gaaraan guul buuxda anagoo siinayna waxbarasho iyo khayraad.


Waan fahmaynaa baahiyaha qoysaskeena si ay u gaaraan guul kasta; laga bilaabo carruurnimada hore iyo kobaca carruurta da'da dugsigu kujira, illaa da'da qaangaarnimada.



**Carruurnimada
Hore**



**Ilmaha kujira da'da
iskuulka**



Qaangaarnimada

Waan ku garab taagan nahay talaabo kasta, anagoo taageerayna qoysaska iyo xirfadlayaasha.

TAAGEERADA FOOL KA FOOLKA AH (1-IYO-1)



Qoysaska iyo xirfadlayaasha ayaa lagu boorinayaa inay la xariiraan mid kamid ah taqasuslayaasheena tababaran ee taageerada si ay u fahmaan nidaamyada ayna ugu xiraan khayraadka. Turjumaad bilaash ay ku helayaan dadka aan ku hadlin Ingiriisga ayaa diyaar ah.

ADEEGYADA TAAGEERADA QOYSKA



Taqasuslayaasheena Taageerada Qoyska ayaa wax bari doona kula shaqayn doona qoysaska shaqsiyaadka naafada ah kooxo yar ama qaab qof iyo qof ah.

CAAWIMAADA U QALMIDA



Caawiyaheena U qalmida ayaa ka caawin kara qoysaska Degmada Erie ama Niagara buuxinta dukumiintiga muhiimka ah si ay u bilaabaan hanaanka u qalmida Xafiiska Dadka qaba Naafooyinka Kobaca (OPWDD).

TAAGEERADA DABEECADA




Taqasuslayaasheena Dabeecada ayaa kala shaqaynaaya qoysaska Degmada Erie ama Niagara ee ay u joogaan qoysaska ku nool guriga una qalma adeegyada OPWDD.

AQOON KOROSIGA IYO MUNAASABADAHA



Waxaan bixinaa aqoon kororsiyada oonleenka ah iyo kuwa toos loo tago si aan uga caawino xubnaha qoyska, shaqsiyaadka iyo xirfadlayaasha inay si fiican u fahmaan naafooyinka ayna u kordhiyaan aqoontooda waxbarashada gaarka ah iyo nidaamyada taageerada.

KHAYRAADKA OONLEENKA AH



Webseedkeena ayaa siinaaya bulshadeena xog iyo khayraad la xariira munaasabadaha soo socda, aqoon kororsiyada, xaashiyaha xogta ee lasoo degsan karo iyo muuqaallada.

